

Sida la noo helo

Waxaanu ku jirnaa dabaqa 29^{aad} ee dhismaha YMCA ee ku yaal 33 Petershill Drive ee Glasgow. Isticmaal wiishka si aad xafiiskayaga dabaqa 29^{aad} u tagto.



Waxaanu qiimaynaa kaladuwaanaashaha. Waxaanu ballan ku qaadnay bixin adeeg iyo goobo shaqo oo ka madhan dhammaan noocyada caga juglaynta iyo midab kala sooca.

Waan la shaqaynaa dhammaan xubnaha bulshada iyadoon la eegin qoomiyadda, diinta, da'da, waddanka, asalka ama waddanka uu qofku soojeedo, jinsiga, doorashada galmada, ama naafonimada.

Scottish Induction Service, 29th Floor, 33 Petershill Drive, Glasgow G21 4QQ Tel: 0141 558 6268 Fax:0141 558 9397,
www.scottishrefugeecouncil.org.uk Scottish Refugee Council is a charity registered in Scotland. SC008639 OISC Reference: N2000100084

Adeegga Scottish Induction Service (SIS)
sida aanu u caawin karno

Abrill 2011



29th Floor

33 Petershill Drive
Glasgow, G21 4QQ

Tilifoonka: 0141 558 6268

Tilifoonka: **0800 085 6087** (hadalku waa bilaash laynka, maya mobilada)

Websaaydka: www.scottishrefugeecouncil.org.uk



Yaanu nahay?

Adeegga Scottish Induction Service (SIS) wuxuu qayb ka yahay golaha Scottish Refugee Council.

Waxaanu nahay urur samofal. Qayb kama **nihin** dawladda UK ama Xafiiska Arrimaha Gudaha. Waxaanu bixinaa adeeg qarsoon oo madax bannaan.

Waxaanu bixinaa talo iyo macluumaad hannaanka magangalyo-doonka, helidda taageero magangalyo-doon (taageero lacageed ama hooy) waxaanannu kaa caawin karnaa helidda adeeg sharci iyo daryeel caafimaad.

Wakhtiyada furnaanta

| | |
|------------|--------------------------------|
| Isniinta | 9:30 – 13:00 iyo 14:00 – 16:00 |
| Salaasada | 9:30 – 13:00 iyo 14:00 – 16:00 |
| Arbacada | 14:00 – 16:00 |
| Kharniista | 9:30 – 13:00 |
| Jimcaha | 9:30 – 13:00 iyo 14:00 – 16:00 |

Sideen u caawin karnaa

SIS ahaan waxaan:

- Bixin karnaa macluumaad ku saabsan hannaanka magangalyo-doonka
- Ku siin karnaa macluumaad iyo talo ku saabsan taageerada magangalyo-doonka iyo hooy
- Kaala talin karnaa xuquuqdaada iyo waxaad mutaysatay
- Sharxi karnaa dokumentis muhiima
- Kaa caawin karnaa helidda wakiil sharci xirfad u leh ka shaqaynta sharciga magangalyo-doonka Scotland
- La hadli karnaa Xafiiska Arrimaha Gudaha anagoo kaa wakiila
- Kaa caawin karnaa inaad iska diiwaangaliso GP waxaanannu ku siin karnaa khariirad iyo tilmaamaha safarka iyo sida meel loo gaadhi karo
- Kaa caawin karnaa haddaad la kulanto cag juglayn iyadooy ugu wacan tahay qoomiyaddaada, diintaada, galmadaada, jinsigaaga tusaale xadgudubka guriga
- Kuu gudbin karnaa wakaalado takhasus oo kale haddii aanu ku caawin kari wayno
- Kaa caawin karnaa cabashooyinka haddaanad helin caawimada aad mutaysatay
- Ku siin karnaa macluumaad ku saabsan qaxootiga iyo ururada bulshada ee kale ee deegaankaaga
- Ku siin karnaa macluumaadka camaliga ah ee ku saabsan nolosha UK, ooy ka mid yihiin meelaha daryeelka bulshada iyo baahiyaha daruuriga ah ee nolosha

Ma karno inaanu

- Ku matalno andacoodkaaga magangalyo-doon
- Ku siino talo sharci; laakiin waan kaala talin karnaa xaqa-u-yeelashada iyo macnaha shuruucda
- Bedelno go'aanada ay gaadheen maamulka deegaanka ama Xafiiska Arrimaha Guduhu

Isticmaalka adeegyadayada

Waxaan isku dayi doonaa inaan ku caawino iyo inaanu fahanno sida arrimuhu niyad-jab iyo wareer u lahaan karaan. Si kastaba, waa waxaan la qaadan karin shaqaalahayaga ama macmiilkayagu inuu yeesho habdhaqan handadaad, baqdin-galin ama weerar ah. Habdhaqanka noocan ah wuxuu keeni karaa in laga joojiyo xafiiskayaga iyo adeegyadayada.

Carruurta

Carruurta waa laga soo dhaweeyaa xafiiska SIS. Fadlan ha kaga tagin carruurta oo kaliya guriga – u soo qaad ballamahaaga.

Soojeedimo iyo cabashooyin

Waxaanu qiimaynaynaa fikraddaada. Fadlan buuxi xogururintayada si aanu u wadi karno horumarinta adeegyadayada. Waa inaanad magacaaga ku qorin xogururinta.

Haddaad jeclaan lahayd inaad cabasho samayso, la hadal mid ka mida la taliyeyaashayada ama buuxi foomka cabashada yaala xafiiskayaga.

Sidoo kale waxaad u caban kartaa Xafiiska Wakiilka Haajiraada

(OISC): <http://www.oisc.gov.uk/>